# Waraysiga Ogolaanshaha (Waraysiga Turkiga)

Bishii Juun 2021, dawladda Giriiggu waxay ku dhawaaqday in Turkigu yahay dal ammaan u ah muwaadiniinta u dhashay Suuriya, Afgaanistaan, Soomaaliya, Baakistaan iyo Bangaaladheesh. Haddii aad ka timid mid ka mid ah dalalkan oo aad magangalyo ka raadinayso Giriigga, Adeega magangalyoda ayaa qaban doona wareysi ku saabsan Turkiga (wareysiga Turkiga), si loo go'aamiyo in codsigaaga magangalyo laga oggolaankaro Giriigga. Wareysiga waxaa loogu talagalay in lagu go'aamiyo in aad ku laaban karto Turkiga, halkii aad kaga sii wadan lahayd magangelyadaada Giriigga.

**Yuu saamaynayaa sharcigan cusub?**

Dadka ka yimid Afgaanistaan, Soomaaliya, Baakistaan, Bangaaladheesh, Suuriya, ee ku sugan Girriiga jasiiradaha ama magaaloyinka waaweyn:

- Ee ka weyn 15 sano (haddii aad haysato carruur da'doodu tahay 15 iyo ka weyn, waxay yeelan doonaan wareysiyo Turki. Carruurta aan la la socon ee jira 15 iyo ka weyn ayaa iyaguna yeelan doona waraysiyadaas. Wareysiyada loogu talagalay carruurta aan qaangaarin waa in ay diiradda saaraan waxay ku jirto danta ugu fiican ee ilmahu)
- *Ee aan weli sheegan magangelyo (marka aad diiwaangeliso dalabkaaga magangalyo ee aad hesho kaarkaaga magangalyada, Adeegga Magangelyada Giriigga ayaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan su'aalo ku saabsan Turkiga ama ku siin kara taariikh kale oo aad u timaado wareysiga Turkiga)*
- *Ee ka raadinaya magangalyo Girriigga ee aan wali galin waraysigooda magangalyada (waxa laga yaaba in waraysigaaga magangalyada loo diiwaangaliyay bilo/sanado kadib, laakiin waxa laguugu yeeri doonaa waraysi Turki ka hor waraysigaaga magangalyada. Haddii waraysigaaga magangalyadu soo dhow yahay, waraysigani wuxuu hadda noqon doonaa waraysi Turki)*

**Ka digtoonow:**

- Waxaa laguugu yeeri karaa waraysiga ‘oggolaanshaha’ ka dib ogaysiis aad u gaaban - mararka qaarkood dhawr maalmood uun ah.
- Dhammaan xubnaha qoyska ayaa si gooni gooni ah loo wareysan doonaa, dhammaan bayaannadu waa inay ahaadaan kuwo is waafaqsan.
- Wax kasta oo aad ka sheegatay wareysigaaga diiwaangelinta (markaad heshay kaarkaaga magangalyo) wuxuu ku qoran yahay diiwaanka waxaana laga yaabaa in Adeegga Magangelyadu hubiyo waxa aad hadda sheegto.

**U sheeg Adeegga Magangalyada Giriigga:**

- Haddii aad codsatay in lagula mideeyo xubin qoyskaaga ka mid ah oo ku nool meel kale oo Yurub (haddii aad ku jirto nidaamka 'Dublin', waa inaadan yeelan waraysi Turki, sababtoo ah waxaad codsanaysaa in codsigaaga magangalyo lagu baaro waddanka qoyskaagu joogo)
- Haddii aad ku leedahay Giriigga xubno ka tirsan qoyskaaga oo la siiyay aqoonsi qaxootinimo ama qaab kale oo oggolaansho si ay u joogaan Giriigga (xiriirka qoysnimo waa inuu ahaadaa mid jiray kolkii dalka hooyo la joogay)
- Haddii aad leedahay xubno qoyskaaga ka tirsan oo aan ka soo jeedin Afgaanistaan, Soomaaliya, Baakistaan, Bangaaladheesh ama Suuriya

**Sharciga cusubi wuu kugu dabaq mayaa xitaa haddii aad nugushahay, laakiin sharax oo bixi caddayn haddii ay suurtogal tahay dhibaatooyinka aad kala kulantay Turkiga sababahoo ah:**

- Waayeel nimo
- Naafooyin
- In aad ilmo yar tahay
- Dhibaatooyin caafimaad oo ay ku jirto maskaxdu
- In aad waalid kali ah tahay
- Uur

**Maxaa dhacaya haddii aan helo go’aan oggolaansho kadib warasigayga oggolaansha ee Giriiga?**

Haddii aad hesho go’aan ogolaansho kadib waraysigaaga khuseeya Turkiga, taa macnaheedu waa in uu xafiiska Adeegga Magangalyada Giriigu aqbalsanyahay in Turkigu ahayn meel ammaan kuu ah waxaanad ka sii wadan doontaa nidaamkaaga magangalyo Giriiga. Waa inaad sugtaa in laguu sheego marka waraysigaaga magangalyo ee dhabta ahi noqon doono.

**Maxay tahay in aan sameeyo haddii diidmo la i siiyo kadib waraysigayga oggolaanshaha ee Giriiga?**

Rafcaan ayaad ka xarayn kartaa go'aanka adiga oo kaashanaya qareen Giriig ah 20 maalmood gudahood. Go'aankaaga waxaa ku siin doona Adeegga Magangalyada ballan qabsan gudaheed ama waxaa laguugu soo diri doonaa boostada ama waxaa laguugu keeni doonaa xerada. Waqtiga kama dambaysta ah ayaa laga xisaabinayaa laga bilaabo maalinta aad si rasmi ah u hesho go'aanka. Haddii aad ku hesho go’aanka boostada, taariikhda rasiidka waxaa lagu qori doonaa anfeloobka waana inaad anfeloobka u haysataa caddayn ahaan.

Haddii rafcaankaaga sidoo kale la diido waxaa suurtogal ah in maxkamad la aado laakiin habsocodkani waa mid cakiran waxaana jira kharashyo ku lug leh. Waa inaad si degdeg ah talo sharci uga raadsataa urur khibrad leh ama qareen.

**Maxaa looga jeedaa haddii codsigayga magangalyo lagu dhawaaqo inuu yahay 'mid aan la oggolaan karin'?**

Haddii aad hesho diidmo kadib waraysigaaga khuseeya Turiga oo aanad rafcaan ka xarayn, ama rafcaankaaga la diido. Taa macnaheedu waxa weeyaan in aadan ka sii wadan karin codsigaaga magangalyo Giriiga waxaana lagaa filayaa in aad ku laabato Turkiga. Waxaad waayi doontaa caawimada ama hoyga dawladeed, haddii aad ka faa'iidayste u tahay cawimooyinkaas. Sharci ahaan, waa lagu xiri karaa oo qasab ayaa dib looguugu celin karaa Turkiga laakiin weli ma cadda waxa dhici doona ficil ahaan.

**Wareysiga oggolaanshaha inta lagu guda jiro waa inaad sheegtaa:**

- Dhibaatooyin kasta oo shakhsi ah oo aad kala kulantay Turkiga, tusaale ahaan ay sabab u yihiin jinsiyaddaada, diintaada, dhalashadaada, ra'yigaaga siyaasadeed, qowmiyaddaada, jinsigaaga, doorbiditaanka galmada.
- Dhibaatooyin kasta oo aad kala kulantay mas'uuliyiinta Turkiga, tusaale ahaan markii aad ka soo tallaabaysay xadka Turkiga si aad u gasho ama uga soo baxdo dalka, ama rabshad kasta oo aad kala kulantay booliska/militariga Turkiga intii aad ku sugnayd Turkiga.
- Dhibaatooyin kasta oo aad la kulantay adigoo isku dayaya inaad dalbato magangalyo, ama nidaamka magangalyada ee Turkiga, oo ay ku jiraan wixii dukumiintiyo ah ee lagu siiyay adiga oo lagaaga codsanayo inaad ka baxdo Turkiga ama kaa mamnuucaya dhulka Turkiga.
- Isku day kasta oo mas'uuliyiinta Turkigu kugu masaafurinayaan ama dib kuugu celinayaan xadka.
- Cabsi kasta oo aad ka qabto in dib loogu celiyo dalkaaga hooyo, sababta oo ah falalka masuuliyiinta Turkiga.
- Wakhti kasta oo xabsi lagu galiyay Turkiga iyo xaaladihii aad kala kulantay xero kasta/ saldhig boolis kasta/ xarun masaafurin kasta iwm,
- Dhibaatooyin kasta oo kaa soo maray si aad daaweyn caafimaad oo lagama maarmaan ah ama taageero kale uga hesho Turkiga.
- Dhibaatooyin kasta oo kaa soo gaadhay helitaanka hoy, cunto ama waxyaabaha kale ee aasaasiga ah intii aad ku sugnayd Turkiga
- Xaalad kasta oo aa ku soo martay Turkiga oo lagugu qasbay inaad shaqayso (oo ay ku jirto ka -faa'iidaysiga galmada) ama ka shaqayso xaalado aasaaskoodu yahay dhiig -miirato.

**Waraysiga oggolaanshaha waxaa loogu talagalay in aad ka hadasho Turkiga oo keliya**, laakiin sheeg:

- ❖ Sababta aad uga soo tagtay dalkaagii hooyo, oo ay ku jiraan rabshad, si xun ula dhaqan ama xabsi aad halkaas kula kulantay (waa muhiim inaad marka hore raadsato macluumaad sharci/talo, haddii ay suurtogal tahay*)*
- ❖ Sidaad aad u degtay Giriigga, tusaale ahaan carruur dugsi aadaa haday jiraan, barashada luqadda Giriigga, ka -qaybgalka adeegyada taageerada caafimaadka ama nafsiga ah ee halkan.

**Su'aalaha laga yaabo in lagu weydiiyo:**

- ➔ Goorma ama waamaxay taariikhda aad ka soo tagtay dalkaaga hooyo iyo wadanadee soo martay inta aanad Giriiga soo galin?
- ➔ Sideed xadka Turkiga ugu soo gudubtay ama sidee Turkiga ku soo gashay? Wax dhibaatooyin ah ma la kulantay kolkaad xadka ka soo gudbaysay eed Turkeyga soo galaysay?
- ➔ Mudo intee leeg ayaad joogtay Turkiga intaanad soo galin Giriiga?
- ➔ Weligaa ma tagtay ama ma soo gasha Turkiga?
- ➔ Maxaad Turkiga uga tagtay?
- ➔ Waligaa xiriir ma la samaysay mas'uuliyiinta Turkiga? Haday jawaabtaadu tahay haa, sii faahfaahi.
- ➔ Ma ka xaraysatay magangalyo ama daganaansho Turkiga?
  Haday jawaabtaadu tahay maya, waayo? Haday jawaabtaadu tahay haa, Ma lagu siiyay xaalad ilaalo ama rukhsad daganaansho?
  Dukumentiyo nooceeya ayaa lagu siiyay? Ma sidataa hadda?
- ➔ Halkeed Turkiga kaga noolayd?
- ➔ Ma ka shaqaysay Turkiga? Haday jawaabtaadu tahay haa, Ma haysatay rukhsad shaqo?
- ➔ Ma ku leedahay xubno qoyskaaga ka tirsa/qaraabo/asxaab/macaarif Turkiga? Haday jawaabtaadu tahay haa, Waamaxay xaaladoodu?
- ➔ Ma u malaynaysaa in aad Turkiga ku laaban karto? Haday jawaabtaadu tahay maya, fadlan sharax